



Ogeysiin habka cabasho ee xuquuqaha shacbi Civil Rights Grievance Procedure Notification (Somali)

Mayo Clinic waxay diyaarisay qaab wax qabad ee cabashada gudaha ayadoo bixineysa xal dhakhsa iyo caddaalad ah eedaynta cabashooyinka ee ficil kasta oo lagu mamnuucay qaybta 504 ee xeerka sharaf soo celinta 1973 (29 U.S.C. 794) ee xeerka dhaqan gelinta waaxda adeegyada caafimaadka iyo dadka U.S. Qaybta 504 waxay mamnuucaysaa in la isku kala sooco xagga cuuryaannimada barnaamij kasta ama wax qabad qaata taagyeero maaliyadeed oo federal ah. Sharciga iyo xeerarka waxaa lagu baaraa xafiiska "Patient experience" ayada uu caawinayo maamulaha xafiiska (507-284-4988) maaulahaa oo loo xilsaaray inuu ahaado isku duwaha xeerka qaybta 504.

Qof kasta oo aaminsan in lagu sameeyay kala sooc ayada ama isaga in uu yahay cuuryaan habkan ayuu cabasho ku xareyn karaa. Waa arin sharciga ka soo horjeeda in Mayo Clinic ay ka aar gudato qof kasta oo xareeya cabasho ama la shaqeeya baaritanka cabasho.

Hab socodka:

- Cabashooyinka waa in lagu soo gudbiyaa 120 maalmood guduhood laga billabo taariikhdiid dhacdada:

Section 504 Coordinator Patient Experience Department
200 First Street SW
Rochester, MN 55902
507-284-4988

- Cabashadu waa in ahaataa qoraal, uuna ku yaalaa magaca iyo cinwaanka qofka xareynaya cabashada. Cabashada waa in lagu caddeeyaa dhibka ama ficilka eeda kala sooca looga sheeganayo in lagu kala soocay iyo sixitaan ama weydiisasho gargaar.
- Isku duwaha qaybta 504 (ama qof uu u magacaabo) ayaa baaritaanka cabashada sameyn doona, Baaritaankan waxaa laga yaabaa in uusan ahayn mid rasmi ah, hase ahaatee waa inuu noqdaa mid dadka daneynaya oo dhami ay awoodaan fursad ay ku keeni karaan wixii caddeyn ah oo la xiriira cabashada. Isku duwaha qaybta 504 ayaa hayn doona galalka

dacwada iyo nuqulada la xiriira cabashooyinka ee Mayo Clinic.

- Isku duwaha qaybta 504 ayaa soo saari doona go'aan qoraal ah ee ku saabsan cabashada muddo aan ka badneyn 30 maalmood marka laga billaabo maalintii la xareeyay.
- Qofka cabashada xareeya racfaan ayuu ka qaadan karaa go'aanka uu gaaro Isku duwaha qaybta 504 Isagoo qoraal u keenaya sakaalka madaxa maamulka ama qof loo xilsaaray arinta muddo 15 maalmood gudohood ah laga billaabo helitaanka go'aankii isku duwaha qaybta 504. sakaalka madaxa maamulka ama qof loo xilsaaray arinta asagoo ka jawaabaya rafcaanka ayuu go'aan qoraal ah ku soo saaraa muddo aan ka badneyn 30 maalmood markii la xareeyay ka dib.
- Helitaanka iyo isticmaalidda habka cabashada qofna kama celinayo inuu ashtako kala soocid oo ku saleysan cuuryaannimo u qorto waaxda adeegyada caafimaad iyo dadka U.S, xafiiska xuquuqaha shacabka.

HHS Office for Civil Rights-Region V

233 N. Michigan Avenue, Chicago, IL 060601

(312)-886-2359 (Voice), (315)-353-5693 (TTY).

<http://www.hhs.gov/ocr/civilrights/complaints/discrimhowtofile.pdf>

Mayo Clinic waxay sameyn doontaa qaban qaabo sax ah oo lagu hubinayo in dadka cuuryamiinta ah la siiyo soo dhoweyno, haddii loo baahdo, in ay ka qayb qaataan habkaan cabasho. Qaban qaabadaa waxaa ka mid noqon kara, aanse ku koobneyn, in dhegoolayaasha la siiyo turjubaanno, in cajalado wax ku duuban yihiin la siiyo kuwa indhoolayaasha ah, ama la siinayo meel aan caqabad lahayn ay howsha ku sii wataan. Isku duwaha qaybta 504 ayaa masuul ka ah qaban qaabidda arintaa.